

**Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (EPA) ee Philanthropy Northwest  
Deeqda Horumarinta Bulshooyinka Region 10 ee Ilaalinta Sinnaanta  
Deegaanka**

**OGAYSIINTA SOO GUDBINTA CODSIYADA**

**Ciwaanka Codsiga:** Deeqda Horumarinta Bulshooyinka Region 10 ee Ilaalinta Sinnaanta Deegaanka ee Hay'adda EPA

**Wadarta Qadarka Maalgelinta:** \$40 milyan

**Qiyaasta Maalgelinta Deeq-hele Kasta:** \$150,000-\$350,000

- Nooca 1aad (Qiimaynta): illaa \$150,000
- Nooca 2aad (Qorshaynta): illaa \$250,000
- Nooca 3aad (Horumarinta): illaa \$350,000

*Hoos ka eeg faahfaahinta deeq kasta.*

**Muddada La Fulinaayo Howlaha:** Deeqaha 1- ama 2-sano; May 2025 - Juun 2027

Maalgelintani waxay u furan tahay ururada u qalma ee miyiga iyo magaaloooyinka ee guud ahaan gobolada Region 10 oo ay maamusho EPA, oo ka kooban Alaska, Idaho, Oregon, Washington iyo 271 Maamulada Qabiilada Asaliga ah.

**Waxaan hadda aqbalaynaa codsiyada deeqaha Nooca 3aad oo kaliya.**

KWakhtiga Kama dambaysta ah (Wareegga Koowaad) *	Wakhtiga
Waxaa furmaaya Wareega Koowaad ee Nooca 3aad ee Codsiga	Oktoobar 8, 2024
Webinarada bixinta macluumaadka	Oktoobar 2024
Waxaa xirmaaya Wareega Koowaad ee Nooca 3aad ee Codsiga	Diseembar 15, 2024 saacadu markay tahay 11:59pm PST
Wakhtiga la qiyaasay ee dib u eegista gudaha ee codsiyada	Janaayo 10 - Febraayo 28, 2025
Wakhtiga la qiyaasay ee ogeysiinta cadsadayaasha la xushay	Maarsa 2025
Walkhtiga la qiyaasay ee ee fulinta/maalinta bilowga heshiiska	May 2025
Taariikhda dhamaadka maalgelinta	May 2027 (deeq 2-sano ah)

\* Ogow in wakhtiyadan kama dambaysta ah ee muhiimka ah waxay khuseeyan deeqaha Wareega Koowaad (Nooca 3aad) oo keliya. Si aad u aragto wakhtiyada kama dambaysta ah ee deeqaha Nooca 1aad iyo 2aad, fadlan eeg jadwalka hoose.

**Linkiga Codsiga:** [https://philanthropynorthwest.fluxx.io/user\\_sessions/new](https://philanthropynorthwest.fluxx.io/user_sessions/new)

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, la xidhiidh:**

[thrivingcommunities@philanthropynw.org](mailto:thrivingcommunities@philanthropynw.org)

Codsigan waxaa loo turjumay siddeed luqadood oo kala duwan. Si aad u hesho tarjumaada codsigan ee luqadaha soo socda, fadlan guji linkiga khuseeya ee hoose:

- Cambodian Khmer
- Shinees
- Kuuriyaan
- Lao
- Ruush
- Somali
- Isbaanish
- Fiyatnaamiis

Wareegga koowaad ee codsiyada ee bisha Diseembar 15, 2024, Philanthropy Northwest waxay **kaliya aqbalaysaa codsiyada Nooca 3aad** ee horumarinta/fulinta mashruuca. Hoos ayay ku qoran yihiin wakhtiyada dhammaan barnaamijka deeq-bixinta:

Wareega	Codsiga Waxa uu Furmaaya	Taarikhda Kama dambaysta ah ee Codsiiga*	Nooca 1aad	Nooca 2aad	Nooca 3aad	Taarikhda Ogeysiinta Xulashada
1	Oktoobar 8, 2024	Desembar 15, 2024			X	Maarso 2025
2	Janaayo 2025	Abriil 2025	X	X	X	Juun 2025
3	Maarso 2025	May 2025	X	X	X	Luulyo 2025
4	May 2025	Luulyo 2025	X	X		Sebtembar 2025
5	Ogosto 2025	Oktoobar 2025	X	X		Desembar 2025
6	Noofambar 2025	Febraayo 2026	X	X		Abriil 2026
7	Febraayo 2026	Abriil 2026	X			Juun 2026

\* Codsiyada waxaa la soo gudbin karaa inta wakhtiyada nooca deeqdani ay furan tahay (oo lagu calaamadeeyay "X"). Ogsoonow in kolomnka "Taariikhda Kama dambaysta ah ee Codsiiga" uu xidhiidh kala dhaxeeyo kolomnka "Taarikhda Ogeysiinta Xulashada". Tusaale ahaan, dhammaan codsiyada Nooca 3aad ee la helo Diseembar 15, 2024 waxaa dib loo eegi doonaa suurtgalnimo ogeysiis xulasho ee Maarso 2025 haddii codsiiga la oggolaado. Codsiyo kasta oo la helo wixii ka dambeeyaa Diseembar 15, 2024 waxaa dib loo eegi doonaa wareegga xiga iyadoo ay suurtagal tahay in ogaysiinta xulashada iyo deeqda la helo Juun 2025.

#### Tusmada Mawduucyada:

Qaybta	Ciwaanka Qaybta	Bogga
	1. Macluumaadka Aasaasiga ah	2
	2. Ujeedada	

	3. U-qalmitaanka iyo Shuruudaha	
	4. Shuruudaha Codsiga	
	5. Kharashyada Bixinnada La Ogolyahay iyo kuwa Aan La Oggolayn	
	6. Dulmarka Barnaamijka iyo Noocyada Maalgelinta La Heli karo <ul style="list-style-type: none"> <li>i) Deeqaha Qiimaynta</li> <li>ii) Deeqaha Qorshaynta</li> <li>iii) Deeqaha Horumarinta</li> <li>iv) Deeqaha Aan Codsiga U baahnayn</li> </ul>	
	7. Wakhtiyada Barnaamijka Deeqaha	
	8. Su'aalaha iyo Tilmaamaha Codsiga	
	9. Habka Dib u eegista	
	10. Shuruudaha Qiimaynta	
	11. Shuruudaha Warbixinta	
	12. Shuruudaha iyo Sharciyada	
	13. Liiska Hubinta Codsiga	

## 1. Macluumaadka Aasaasiga ah

Baraamijka Deeqda Horumarinta Bulshada ("Barnaamijka Bulshooyinka Horumaraaya") ee Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (EPA) **waxay rabta inay u fududaysu ururada bulshada inay helaan deeqaha maalgelinta deegaanka ee federaalka**. Philanthropy Northwest waxa ay abuurtay habka deeqaha sida ugu fudud ee suurtogalka ah iyada oo la adeegsanayo miisaaniyadaha federaalka, sidaa darteed codsadayaasha waa in aysan niyad jabin. Hawlaha mashruuca waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn, mashaariicda deegaanka ee horumarinaaya tayada hawada, tayada biyaha, nadiifinta deegaanka, biyaha wasakhda ah, ama naadifiinta waxyeellada sunta lead-ka ama asbestos-ka.

Hadafku waa in hoos loo dhigo caqabadaha hortaagan dadaaladan iyo in la bixiyo habka cogsiga fudud ee maalgelinta federaalka, oo ay ku jiraan foomam yar, shuruudaha miisaaniyada, hab mashruuc codsi oo fudud iyo habka deeqaha oo sahlan oo lagu socdo. Philanthropy Northwest iyo hay'adaha kale ee bixiyada taageerada farsamada ayaa ku siin doona caawimo inta uu socdo cogsiga iyo nidaamka maaraynta deeqaha.

Baraamijka Deeqda Horumarinta Bulshada waxaa abuuray maamulka Biden-Harris iyada oo qayb ka ah Ajeendaha Maalgelinta Kaaba yaasha Dhaqaalaha ee Maraykanka. Iyadoo la isticmaalaayo Xeerka Dhimista Sicir bararka, maalgalinta ugu weyn taarikh ahaan ee wax ka qabashada isbeddelka cimilada. Maamulka ayaa muddo seddex sano ah gudahood barnaamijka deeqa ah u balan qaaday \$600 milyan oo doolar guud ahaan dalka oo dhan. Barnaamiju waa qayb ka mid ah [the Federal Interagency Thriving Communities Network](#) (Shabakadda Isku-xidhka Horumarinta Bulshooyinka ee Federaalka ah) wuxuuna soo bandhigayaa Hindisaha [Justice40 Initiative](#) ee Maamulka ee waafaqsan Amarka Fulinta ee 14008, kaas oo

dejiyey yoolka in 40% faa'iidooyinka maal-gashiga federaalka qaarkood la siiyo bulshooyinka danyarta ah kuwaas oo lagu takooray maalgashi oo dhibaato badan saaray wasakhowga hawada. Sida uu dhigayo Amarka Fulinta 14008, kaas oo dejiyay yoolka in 40% faa'iidooyinka maal-gashiga federaalka qaarkood lagu maalgeliyo bulshooyinka danyarta ah ee uu wax yeelo u gaystay maalgashiga liita iyo wasakhowga hawada

Bishii Disembar 2023, ururka Philanthropy Northwest oo kaashanayso shabakadyo ballaaran oo wada-hawlgalayaal goboleed ah oo ku baahsan guud ahaan EPA-yada Region 10, ayaa loo doortay inay Deeqaha siiso Barnaamijka Deeq-bixinta Horumarinta Bulshooyinka . Region 10 wuxuu ka kooban yahay gobolada Alaska, Idaho, Oregon, Washington iyo 271 Maamulada Qabiilada Asaliga ah ee ku yaala goboladaas. Hadafyada Philanthropy Northwest waa in ay ilaha iyo agabyada ay siiso bulshooyinka aan taariikh ahaan maalgashi helin iyada oo ka faa'iidaysanaysa iskaashigan, fududaynta deeq-bixinta ka qaybqaadashada iyo qaabaynta habka codsiga ee la fududeeyay. Philanthropy Northwest waxay gobolladan u qaybin doontaa \$40 milyan muddo saddex sano ah gudahood.

Waxaa jira saddex nooc oo deeqo ah oo ay urur-hoosaadyadu codsan karaan:

- **Nooca Koowaad (Mashruucyada Qiimaynta) illaa \$150,000** (1 sano oo mashruuca soconaya): *maalgelintu waxa ay diiradda saartaa ururinta macluumaadka, qiimaynta iyo fahamka mushkiladaha ka hor inta aan la samayn qorshe.*
- **Nooca Labaad (Mashruucyada Qorshaynta) illaa \$250,000** (1 illaa 2 sano oo mashruuca soconaya): *deeqo loogu talagalay ururada hore u lahaa faham buuxo oo ku saabsan deegaanka iyo/ama arrimaha caafimaadka bulshada oo diyaar u ah inay abuuraan qorshi bulsho oo wax looga qabanaya arrimahaas.*
- **Nooca Seddexaad (Horumarinta Mashruuca) illaa \$350,000** (2-sano oo mashruuca soconaya): *deeqo loogu talagalay ururada hore u lahaa faham buuxa xooggan oo ku saabsan ariimahah deegaanka iyo/ama arrimaha caafimaadka dadweynaha, oo horey u dejiyeen qorshe bulsho oo dhan ah oo wax looga qabanayo arrimahaas, iyo /ama hadda diyaar u yihii inay horumariyaan dhinacyada farsamada ee mashruuca (ie, hirgalinta mashruuca).*

Waxa kale oo jiri doona lacag yar oo kooban oo ah \$75,000 oo go'an oo wax aan tartan iyo codsi ah lahayn oo loo heli karo ururrada bulshada danyarta ah taageera. Maalgelintani waxay mudnaanta siin doontaa hay'adaha dhisaya awooddooda si ay u maareeyaan mashaariicda waaweyn iyo lacagaha maalgelinta.

## 2. Ujeedada

Deeqaha Horumarinta Bulshada ee Region 10 ayaa maalgalin siin doonta ururada wax ka qabta taageeirda bulshada ay saamayso waxyeellada deegaanka ee gobolka oo dhan.

Barnaamijka deeqdan waxaa ka go'an inuu si siman maalgelinta EPA ugu qaybiso:

- Ururada ay hogaaminayaan oo u adeegto bulshooyinka inta badan la dayacay, la takooro, oo ay sida xun u saamaysay xaaladaha faqriga joogtada ah iyo/ama sinnaan la'aanta; ama
- Ururada ka howl gala oo la shaqeeya bulshooyina ku nool miyiga iyo goobah fogfog;
- Ururada wax ka qabta ilaalinta deegaanka: taageeridda bulshooyinka wajaha xaaladaha waxyeellada deegaanka ee ka dhasha hawlgalada ganacsi ama fulinta barnaamijyada/xeerarka dadweynaha.

Philanthropy Northwest waxay mudnaan siin doontaa mashaariicda taageera bulshooyinka qaybta ka ah hindisaha Justice40 oo sida tooska ah uga qaybta uga ah bulshooyinka iyo dadka ay saamaysay waxyeellada deegaanka.

*Ilaalinta deegaanka* macneheedu waa in si cadaalad ah loola dhaqmo oo loola xidhiidho dadka oo dhan, iyada oo aan loo eegin dakhliga, jinisga, midabka, asalka qaran, qabiilka ama naafanimada, wax kasta oo go'aan qaadashado ah ee wakaalada iyo hawlaha kale ee federaalka ee saameeya caafimaadka dadka iyo deegaanka si dadku:

- Si buuxda ah looga ilaaliyo waxyeellada deegaanka ee caafimaadka bini'aadamka (oo ay ku jiraan khataraha) iyo saamaynada, oo ay ku jiraan kuwa la xidhiidha isbeddelka cimilada, saamaynta daran ee deegaanka iyo culaysyada kale, iyo saamaynada taarikhiga ah ee cunsuriyadda ama caqabadaha kale ee nidaamyada ku salaysan
- Si siman u helaan deegaan caafimaad leh oo nabbadoon oo lagu noolaado, lagu ciyaaro, lagu shaqeeyo, wax lagu barto, lagu koro, lagu cibaadeysto, lagana qayb qaato dhaqamada iyo howlaha nolol-maalmeedka.

### **3. U-qalmitaanka iyo Shuruudaha**

Maalgelintani waxay u furan tahay ururada u qalma ka howlgala miyiga iyo magaalooyinka ee EPA-yada Region 10, oo ay ku jiraan Alaska, Idaho, Oregon, Washington, iyo 271 Maamulada Qabiilada Asaliga ah.

Ururada u qalma waxaa ka mid ah:

- Ururada aan faa'iido doonka ahayn, ururada bulshada aan faa'iido doonka ahayn ee bulshada u shaqeeya
- Dawladaha qabaa'illada ah (labadaba kuwa dawladda federaalka aqoonsan yihiin iyo kuwa dawlad-goboleedku aqoonsan yihiin) iyo maamulada isbahaysiga qabaa'ilka dheddooda
- Maamullada dawladaha hoose: gobolada, degmooyinka, magaalooyinka
- Machadyada tacliinta sare

- Hay'adaha asaliga ah ee ay hogaamiyaan Bulshada dhaladka Ameerikaanka ah

Kooxaha aan u qalmin waxaa ka mid ah:

- Shakhsiyadka
- Ganacsiyada faaido doonka ah
- Dawlad goboleedyada
- Urur kasta oo laga joojiyyay ama laga saaray maalgelinada dowladda federaalka ah

Macluumaadka looga baahan yahay diiwaangelinta ee bogga codsiga deeqda waxa ka mid ah xaqijiinta in mashruuca aad codsanayso aanu wax lug ah ku lahayn hawlahan aan la oggolayn ee hoos ka muuqda:

- Ololaynta
- Talo sharci, adeegyo, ama wakiil
- Howlaha taageera arrimaha diineed sida cibaadada, ducada, faafinta diinta, ama barashada diinta

### **Tirada ugu badan ee deeqaha ee uu ururkiiba heli karo**

Si loo xaqijiyo in si siman loo qaybiyo lacagaha, ururadu waxaa kaliya loo oggolyahay in ay helaan hal maalgelin oo ah Barnaamijka Horumarinta Bulshada ee gudaha Region 10 muddada saddexda sano gudahood.

Marka la eego macnaha deeq-bixinta, urur kasta waxa lagu aqoonsaday lambarka aqoonsiga loo-shaqeeyaha (EIN), diiwaangelinta gobolka ee ururada aan faaido doonka ahayn, ama aqoonsiga qabiilka. Qabaa'ilka Dhalada Mareykanka ee federaaliga ah iyo kuwa gobolkaba aqoonsan yahay labaduba waxay xaq u leeyihii inay codsadaan deeqaha iyadoo lagu salaynayo xaaladdooda sharchiyeed. Tusaale ahaan, urur goboleed ama qaran oo leh ururo badan, ama dawlad beeled iyo hay'adaheeda aan faa'iido doonka ahayn, waxay xaq u yeelan karaan inay helaan wax ka badan hal deeq haddii mid kastaa uu ku shaqeeyo EIN gaar ah, aqoonsiga ururka aan faa'iido doonka ahayn ee gobolka, ama aqoonsiga qabiilka. Tani waxay hubinaysaa in hay'ado kala duwan oo ku jira shabakad urureed oo ballaadhan ama hab maamul qabiil ay si madax-bannaan u codsan karaan, waa haddii ay buuxinayaan shuruudaha deeqaha gaarka ah.

Codsadayaashu waxay isticmaali karaan kafaala-qaade maaliyadeed, oo leh xaddidaadyo qaar. Shakhsiga kafaala-qaade maaliyadeedka ah wuxuu heli karaa ilaa shan deeq oo shakhsiga ahaaneed, iyadoo ugu badnaan \$1 milyan lagu maalgelinayo barnaamijka.

A fiscal sponsor is considered the applicant organization and is responsible for all aspects of the grant, including compliance with the grant agreement, financial management, reporting and ensuring that the funded activities align with the grant's objectives. A fiscal project should not apply without its fiscal sponsor's knowledge and consent. Exceptions to the limitation on the number of grants

received by an individual organization.

#### **4. Shuruudaha Codsiga**

Codsiga Barnaamijka Horumarinta Bulshada waxaa laga heli karaa [halkan](#). Dhammaan cadsadayaasha waxaa looga baahan doonaa inay buuxiyaan cadsiga buuxa, oo ay ku jiraan ku lifaaqida dhammaan dukumentiyada la cadsaday ee la tilmaamay.

Cadsadayaashu waa inay haystaan Aqoonsiga Hay'adda Gaarka ah (UEI) ee Nidaamka Federaalka ee Maareynta Deeqaha (SAM) si ay xaq ugu yeeshaan inay helaan lacagaha maalgelinta. Hay'adaha aan weli haysan aqoonsiga UEI, fadlan la soco waxay qaadan kartaa dhawr toddobaad in la diiwaan geliyo. Diiwaangelinta SAM looma baahna wakhtiga soo gudbinta, laakiin haddii la siiyo deeq, ururkaagu wuxuu u baahan doonaa lambarka diiwaangelinta SAM ee hadda/kan la ogolaaday.

Codsadayaasha aan haysan khad interneet ah oo sugar waxay la shaqayn karaan Sarksalka Barnaamijka PNW si ay xal ugu helaan soo gudbinta cadsiga.

Haddii aad u baahato taageero dheeraad ah si aad u soo gudbiso cadsiga, fadlan iimayl ugu dir Barnaamijka Horumarinta Bulshada

[thrivingcommunities@philanthropynw.org](mailto:thrivingcommunities@philanthropynw.org)

Si aad u gasho nidaamka cadsiga, waxaad marka hore u baahan doontaa inaad iska diiwaan geliso Fluxx, oo ah nidaamka deeqaha onlaynka ah oo loo habeeyay inuu ka dhigo habka cadsiga mid fudud oo la heli karo. Adiga oo isticmaalayso Fluxx, waxaad soo gudbin doontaa cadsiga oo haddii aad si guul leh ugu hesho deeqda, goobtani waa sidoo kale meesha aad ku soo gudbin doonto warbixinnada deeqdaada.

Macluumaadkaaga gelitaanka ma kaydiso ururka Philanthropy Northwest markaa fadlan ku kaydi meel aamin ah si aad ugu gasho nidaamka Fluxx. Haddii aad la kulanto wax cillada farsamo ah oo ku saabsan samaynta akoonka Fluxx, fadlan iimayl noogu soo dir [fluxxta@philanthropynw.org](mailto:fluxxta@philanthropynw.org).

Ka dib markaad isdiiwaan geliso, waxaad awoodi doontaa inaad gasho nidaamka cadsiga deeqda. Marka bilowdo, waxaad awoodi doontaa inaad kaydiso horumarkaaga markaad ku howlan tahay cadsiga, uma baahna in cadsiga lagu dhameeyo hal fadhi.

#### **5. Kharashyada Bixinnda La Ogolyahay iyo kuwa Aan La Oggolayn**

Codsadayaasha waxaa lagula talinayaa inay soo booqdaan bogga [Sida Loo Sameeyo Miisaaniyad | US EPA](#) si ay dib ugu eegaan tababbarka onlaynka ah ee horumarinta miisaaniyada deeqda EPA.

<b>Tusaalooyinka kharashyada la ogolyahay waxaa ka mid ah:</b> <ul style="list-style-type: none"><li>• Lacagaha mushaharka</li></ul>	<b>Tusaalooyinka kharashyada aan la oggolayn waxaa ka mid ah*:</b> <ul style="list-style-type: none"><li>• Kharashaadka cabbitaannada khamriga</li></ul>
--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

- |                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                          |                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                     |
|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| <ul style="list-style-type: none"> <li>• Kharashyada Magdhawga ah</li> <li>• Kharashyada Alaabaha lagu isticmaali doono mashruuca</li> <li>• Kharashyada Alaabaha lagu isticmaali doono mashruuca</li> <li>• Kharashaadka adeegyada ay bixiyaan qandaraasleyaasha ama lataliyayaasha ee si toos ah ula xidhiidha mashruuca (eeg hagaha ku saabsan qiimaha lataliyaha oo aan ka badnayn \$91.95 saacaddii).</li> <li>• Qalabka lagama maarmaanka u ah mashruuca ( buuxinaya shuruudo gaar ah)</li> <li>• Kharashyada tababarka iyo hawlaha waxbarashada la xidhiidha mashruuca iyo</li> <li>• Kharashaadka aan tooska ahayn oo leh qiime aan toos ahayn oo la ansixiyay ama lagu dabaqi karo 15% si loo dabool</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>• Kharashyada lagu bixiyo ganaaxyada</li> <li>• Kharashyada la xidhiidha ololaynta ama hawlaha siyaasadda</li> <li>• Kharashaadka cuntooyinka shirarka, cabitaannada, cuntooyinka fudud, adeegyada cuntada. Kharashyada cabitaannada fudud iyo cuntada ee shirarka shaqaalaha iyo hawl maalmeedka la midka ah lama oggola sida waafaqsan heshiisyada kaalmada EPA.</li> <li>• Hadiyadaha</li> <li>• Tigidhada safarada first class/business class</li> </ul> |
|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|

\*Kharashyada aan la ogolaan waa laga mamnuucay in lagu isticmaalo lacagaha EPA. Ururadu waxay meel kale ka raadsan karaan maalgelin si ay u taageeraan baahiyahooda, sida kharashaadka cuntada shirarka, oo ka baxsan codsigan deeqda.

## **6. Dulmarka Barnaamijka iyo Noocyada Maalgelinta La Heli karo**

Barnaamijka Horumarinta Bulshada wuxuu bixiyaa seddex nooc oo deeq oo mashruuca ah:

Nooca laad: Qiimaynta - Waxaa loogu talagalay bulshooyinka u baahan inay ururiyan macluumaadka oo ay fahmaan dhibaatada waxyeellada deegaanka ka hor intaanay samaynin qorshe oo ay qaadaan tallaabo ay wax uga qabtaan oo u xaliyaan dhibaatada.

Nooca 2aad: Qorshaynta - Waxaa loogu talagalay bulshooyinka diyaarka u ah inay abuuraan qorshe bulsho si wax looga qabto arrimaha waxyeellada dhibaatada deegaanka. Tani waxa ka mid noqon kara horumarinta iskaashiga ururada kale, qabashada shirarka qorshaynta, iyo abuurista qorshe hawleed leh yoolal, ujeedooyin, iyo talaabooyin la qaado.

Nooca 3aad: Horumarinta Mashruuca - Waxaa loogu talagalay bulshooyinka hore u lahaa faham xooggan ee deegaanka iyo/ama arrimaha caafimaadka dadweynaha, hore u dejiyay qorshe bulshada oo dhan ah oo loogu talagalay arrimahaas, iyo/ama hadda diyaar u ah fulinta qorshaha.

Nooc kasta oo deeq ah waxay leedahay wakhti u gaar ah oo lagu fuliyo mashruucyada.

Nooca Deeqda	Qadarka Deeqda	Muddada Isticmaalka Deeqaha
Nooca Koowaad: Mashruucyada Qiimaynta	Illaa \$150,000	Ilaa hal sano (12 bilood)
Nooca Labaad: Qorshaynta	Illaa \$250,000	1 ama 2 sano
Nooca Seddexaad: Horumarinta Mashruuca	Illaa \$350,000	2 sano

Tusaalooyinka mashaariicda ilaalinta deegaanka ee laga yaabo in la maalgeliyo waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:

- Tayada hawada & neefta
- La socodka tayada hawada xaruumaha wasakhawga hawada sababa
- Tayada biyaha & muunadeynta
- Mashruuc yar oo nadiifin ah
- ISahlidda adeegyada helitaanka cuntada si loo yareeyo maylalka safarka
- Arrimaha wasakhawga iyo [dhisidda kaabayaasha cagaarka ah](#)
- Wasakhda Lead-ka iyo asbestos-ka
- Sunta cayayaanka iyo walxaha kale ee sunta ah
- Barnaamijyada horumarinta caafimaadka qaba ee tamarta/biyaha ah ayaa si hufan u isticmaala oo aan lahayn wasakhawga hawada gudaha
- Dadaalada wax ka qabashada howlaha qashin-qubka ee sharci-darrada ah, sida waxbarashada, wacyi-gelinta, iyo nadiifinta
- U diyaargarowga degdega ah iyo la tacaalidda musiibada
- Tababarka shaqada deegaanka ee xirfadaha yareeya qiiqa gaaska dhirta lagu koriyo iyo wasakhawga kale ee hawada
- Tababarka ilaalinta deegaanka ee dhalinyarada
- Waxyaabaha kale

Mashruucyada soo bandhiga howlaha cilmi-baarista, muunada, tijaabada, kormeerka, baadhitaannada, isticmaalka xogta deegaanka iyo hawlaha kale ee cilmi

sayniska ku salaysan waxay u baahan yihiin Qorshaha Hubinta Tayada Mashruuca (QAPP) kaas oo lagu bixin karo deeqdan. Wixii maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha QAPP, fadlan booq [websaydkan EPA](#) ama [linkigan](#) si aad u ogaato maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan xog ururinta.

Haddi aad samaynayo hawlo cilmi baadhiseed oo maadada aadanaha ah oo qayb ka ah borotokoolka mashruucaaga waxa uu u baahan doonaa in uu ansixiyo Guddiga Dib u Eegista Hay'adaha (IRB) iyo sidoo kale Sarkaalka Daraasaadka Mawduuca Aadanaha (HSRRO) ee EPA. Si aad wax badan u ogaato in shaqadaadu ay qayb ka noqon doonto samaynta cilmi baadhista maadooyinka aadanaha ah, boqo [FAQ-keena](#).

### **Nooca 1aad Mashruucyada Qiimaynta - 1 sano, ilaa \$150,000**

Deeqaha qiimaynta Nooca 1aad waxa loogu talagalay bulshooyinka u baahan in ay ururiyaan maclumaadka oo ay fahmaan dhibaatada ka hor inta aanay samayn qorshe oo ay qaadaan tallaabo ay wax uga qabtaan oo ay ku xaliyaan dhibaatada.

Deeqaha qiimayntu waxay diyaar u yihiin ururada iyo codsadaayaasha si ay u caawiyaan inta lagu jiro tillaaboooyinka ugu horreeya ee shaqadooda si ay wax uga qabtaan arrimaha gaarka ah ee saameeya iyaga deegaab ahaan iyaga oo samaynaya qiimeynta walaacyada deegaanka iyo caafimaadka dadweynaha. Deeqaha qiimaynta Nooca 1aad waa ilaa \$150,000 oo waxa uu mashruuca soconaya muddo hal sano ah.

Waxyabahan soo socda waa liiska howlaha laga yaabo in loo tixgeliyo sida deeqda Nooca 1aad. Tusaalooyinkan waxa loo bixiyay ujeeddooyin muujineed oo keliya oo liisku ma aha mid dhammaystiran:

- Cilmi-baadhis, tayo iyo/ama tiro\*
- Muunadda\*
- Qiimaynta\*
- Kormeerka\*
- Baadhitaanada\*
- Xog-uruurin iyo daraasado
- Wacyigelinta dadweynaha

(calaaamadda \* waxay muujinaysaa in QAPP loo baahan karo)

### **TUSAALAAHA MASHRUUCA NOOCA 1AAD**

Hay'ad yar oo aan faa'iido doo n ahayn oo taageerta wax soo saarka cunnada maxalliga ah ayaa la siiya si ay u bilaabaan beerista cunnooyinka. Nasiib darro, qaybtan ayaa loo isticmaalay qashin-qubka sharcı-darrada ah waxaana jira bacaha qashinka iyo qashinka kale ee guriga yaalla. Maalgelintani waxay taageeri doontaa isuduwidda mutadawiciinta si ay u sameeyaan xog-uruurin isdhaafsi ah si ay u diiwaangeliyaan horumarka loo baahan yahay ee lagama maarmaanka ah iyo

khataraha caafimaad ee ka dhalan kara goobta. Mashruuca noocaan ah waxay u badan tahay inuu u baahdo Qorshaha Mashruuca Hubinta Tayada (QAPP) sababtoo ah macluumaaadka deegaanka waa la ururinaya, la qimaynaya oo la isticmaalaya. Hay'ada waxay u baahan doontaa in ay la shaqeeeyso sarkaalkooda barnaamijka si uu si fiican u fahmo nidaamka QAPP.

### **Nooca 2aad Mashruucyada Qorshaynta - 1-2 sano, ilaa \$250,000**

Deeqaha Qorshaynta Nooca 2aad waxaa loogu talagalay hay'adaha qiimeeyey arrimaha ilaalinta deegaanka ee bulshadooda diyaarna u ah inay abuuraan qorshe bulsho oo dhan ah si wax looga qabto arrimahaas. Tani waxa ka mid ah horumarinta iskaashi lala yeesho daneeyayaasha iyo ururada kale, qabashada shirarka qorshaynta, iyo abuurista qorshe hawleed leh yoolal, ujeedooyin, iyo talaabooyinka la qaadi doono.

Howlaha qorshaynta mashruuca waxay wax ka qaban kara wax ka badan hal arrin oo deegaanka ah - tusaale ahaan, tayada hawada iyo tayada biyaha labadaba. Deeqaha Nooca 2aad waa ilaa \$250,000 midkiiba oo muddo mashruuc ah hal ama laba sano ah.

Waxyabahan soo socda waa liiska howlaha laga yaabo in loo tixgeliyo sida deeqda Nooca 2aad. Tusaalooyinkan waxa loo bixiyay ujeeddooyin muujineed oo keliya oo liisku ma aha mid dhammaystiran:

- Qorshaynta
- Samaynta Wada-shaqaynta
- Wacyigelinta iyo waxbarashada dadweynaha
- La shaqaynta xubnaha bulshada si wax looga qabto arrimaha deegaanka
- Hawlaha tababarka ee ururada bulshada iyo xubnaha bulshada
- Mashruucyo iyo howlaha lagu dhiirigelinayo ka-qaybgalka bulshada, sida nadiifinta meelaha bannaan ama dayacan
- Iibsashada dhul yar oo mashruuca loogu talagalay oo u baahan in ka yar kala badh wadarta deeqda (ilaa \$125,000)

SMashruucyada la midka ah ayaa sidoo kale u qalma.

### **TUSAALAAHA MASHRUUCA NOOCA 2AAD**

Ururka Community Action waxa ay isku keeni doontaa maamulka guryaynta deegaanka, maamulka tamarta korontada iyo ururada adeega si ay isugu dubbaridaan wada shaqaynta Guryaha Badqab leh iyo ololaha isticmaalka korontad. Ololahan ayaa waxaa ka faa'iideysan doona bulshada danyarta ah ee si dhulkooda looga dhiso waddo sanado ka hor. Mashruucu waxa uu diiradda saarayaa abuurista qorshe bulshada oo dhan ah oo ay ku jiraan ka-qaybgalka daneeyayaasha, kullamada tababarka iyo wacyigelinta dadweynaha.

### **Nooca 3aad Horumarinta Mashruuca - 2 sano, ilaa \$350,000**

Deeqaha Horumarinta Mashruuca Nooca 3aad waxaa loogu talagalay bulshooyinka horay u lahaa faham xooggan oo ku saabsan arrimaha deegaankooda iyo/ama arrimaha caafimaadka dadweynaha, oo horey u sameeyay natijjooyin cilmi-baaris oo ku saleysan iyo/ama qiimeyeenta la dhammeeyay, horey u dejiyay qorshe bulshada oo dhan ah wax ka qabanaaya arrimahaas. , iyo/ama hadda diyaar u ah fulinta mashruuca dhulka.

Samaynta ama joogteynta iskaashiga muhiimka ah ee daneeyayaasha bulshada waa qayb muhiim ah oo ka mid ah horumarinta iyo hirgelinta qorshe bulshada oo dhan waxtar u leh. Sidaa darteed, samaynta iskaashiyo waxay sidoo kale qayb ka noqon kartaa mashaariicda horumarineed.

Hawlaха mashruuca horumarinta waxay wax ka qaban karaan dhibaatooyin badan oo deegaanka ah- tusaale ahaan, soo-gaadhista waxyeellada lead-ka iyo asbestos labadaba. Deeqaha Nooca 3aad waa ilaa \$350,000 muddo mashruuc ah oo laba sano ah.

Waxyaabahan soo socda waa liiska howlaha laga yaabo in loo tixgeliyo sida deeqda Nooca 3aad. Tusaalooyinkan waxa loo bixiyay ujeeddooyin muujineed oo keliya oo liisku ma aha mid dhammaystiran:

- Qorshaynta mashaariicda dhismaha ama nadiifinta, naqshadaynta, iyo horumarinta farsamada
- Codsiga iyo helitaanka oggolaansho ku aadan mashruuca deegaanka
- Libsashada dhul yar oo u baahan in ka yar kala badh wadarta deeqda (ilaa \$175,000)
- Hirgelinta qorshayaasha mashruuca
- Wacyigelinta dadweynaha iyo waxbarashada bulshada ee arrimaha ilaalinta deegaanka
- Howlaha nadiifinta iyo dayactirka

Mashruucyada la midka ah ayaa sidoo kale u qalma. Fadlan la xidhiidh shaqaalahayaga hadii aad qabto wax su'aalo gaar ah oo ku saabsan waxyaabah u-qalmitaanka mashruucaaga.

### **TUSAALAH MASHRUUCA**

Maamul beeleetdka reer miyi ah ayaa sannado badan isha ku haysay hoos u dhaca tayada biyaha ee webiga Blue River ka dib markii ay joojiyeen hawlihii macdan qodista ee biya-mareenkay Toban sano ka hor. Xubnaha qabaa'ilka waxay ku tiirsan yihiin durdurka iyo webiga si ay uga helaan biyo ay cabbaan iyo nolol maalmeedka laakiin waa inay xaddidaan dhaqdhaqaqyadaas sababtoo ah wasakheynta biyaha ayaa zaaid ah oo tirada kalluunka webiga waa ay sii yaraanaysa. Maamul beeleetdka waxay dhawaan dhammadaysay Qorshaha Khayraadka Dabiiciga ah kaas oo qoray wax

ka qabashada arrintan tayada biyaha oo ah mudnaanta sare waxaana ku jira Qorshaha Mashruuca Hubinta Tayada (QAPP) kaas oo horay loogu ansixiyay EPA iyada oo loo marayo mashruuc kale oo deeq ah. Deeqdan ayaa gacan ka gaysan doonto inay bilaabaan fulinta saddex hindise oo ku aadan tayada biyaha ah oo lagu qeexay habka qorshaynta.

## **7. Wakhtiyada Howlaha Barnaamijka Deeqda**

Fadlan eeg wakhtiga la qorsheeyay ee dib u eegista iyo maalgelinta ee weji kasta oo deeqda. Codsiyada deeqda waxaa loo aqbali doonaa si isdaba socod ah ee marka ugu horayso oo ay furan tahay (oo lagu calaamadeeyay "X" hoose); si kastaba ha ahaatee, wareeg kastaa wuxuu leeyahay wakhti cayiman si loo fududeeyo habka dib u eegista deeqaha oo loo sameeyo si cadaalad ah oo wakhtigeeda neh ku habboon. Fadlan ogow in taariikhaha codsigu ay isbedeli karaan oo laga yaabo in la cusboonaysiyo si xilliyo ah ee muddo saddexda sano ee maalgelinta deeqda. Wixii isbeddel ah waxaa laga heli karaa [websaydka](#) Philanthropy Northwest.

Wareega	Codsiga wuxuu Furmaayaa	Taariikhda Kama dambaysta ah ee Codsiga *	Nooca 1aad	Nooca 2aad	Nooca 3aad	Taarikhda Ogeysiinta Xulashada
1	Oktoobar 8, 2024	Diseembar 15, 2024			X	Maarso 2025
2	Janaayo 2025	Abriil 2025	X	X	X	Juun 2025
3	Maarso 2025	May 2025	X	X	X	Luulyo 2025
4	May 2025	Luulyo 2025	X	X		Sebtembar 2025
5	Ogosto 2025	Oktoobar 2025	X	X		Diseembar 2025
6	Noofambar 2025	Febraayo 2026	X	X		Abriil 2026
7	Febraayo 2026	Abriil 2026	X			Juun 2026

\* Codsiyada waxaa lagu aqbalaa si isdaba joog ah in ay furan tahay wakhtiga nooca deeqdani (oo lagu calaamadeeyay "X"). Ogsoonow in kolomnka "Taariikhda Kama dambaysta ah ee Codsiga" uu xidhiidh la leeyahay kolomnka "Taarikhda Ogeysiinta Xulashada". Tusaale ahaan, dhammaan codsiyada Nooca 3aa ee la helo Diseembar 15, 2024 waxaa dib loo eegi doonaa taariikhda abaal-marinta ee Maarso 2025 haddii la oggolaado. Codsiyo kasta oo la helo wixii ka dambeeya Diseembar 15, 2024 waxaa dib loo eegi doonaa wareegga xiga iyadoo ay suurtagal tahay in deeqda la abaalmariyo Juun 2025.

Haddii codsigaaga la xusho, wakhtiga mashruucaaga u dambeeya waxa lagu qori doonaa heshiiska deeqaha waxana uu bilaabmayaa isla marka heshiiska deeqda la saxiixo. Ma bixin karno wax kordhin wakhi ah, markaa fadlan qorshee si aad u hubiso

in maalgelinta deeqda la kharash gareeyo dhammaadka muddada abaalmarinta. Dhammaan maalgelinta waa in lagu kharash gareeyaa oo la isticmaalaa muddada heshiiska deeqda.

## **8. Su'aalaha iyo Tilmaamaha Codsiga**

Fadlan ka eeg websaydka [Thriving Communities](#) si aad u hesho nooca Word ee lala soo Dagi karo ee su'aalaha codsiga si ay kaaga caawiyaan qorsheynta codsigaaga deeqda. Shaqaalaha Philanthropy Northwest waxay qaban doonaan taxane webinaro ah si ay u taageeraan codsadayaasha wax ku aadab horumarinta codsiga, oo ay la socoto kullen fool ka fool ah oo lala yeelan karo Saraakiishayada Barnaamijka. Fadlan gal websaydka Philanthropy Northwest si aad u hesho wixii maclumaad dheeraad ah ama la xidhiidh cinwaanka iimaylka [thrivingcommunities@philanthropynw.org](mailto:thrivingcommunities@philanthropynw.org).

## **9. Habka Dib u eegista**

Koox ka kooban xubnaha bulshada ayaa dib u eegi doona oo qiimayn doona codsi kasta, marka hore si gaar ah, ka dibna si wadajir ah. Philanthropy Northwest waxay dib u eegi doontaa dhammaan qiimaynada codsiga si loo hubiyo qaybinta saxda ee ku salaysan sinnaanta juqraafiga iyo tirakoobka.

Philanthropy Northwest waxay isticmaali doontaa habka dib u eegista ee ku salaysan bulshada si ay u qiimeeyaan codsiyada, taas oo udub dhedaad u noqon doonta go'aan gaarista bulshada Region 10, si loo adeegsado khibradooda iyo aragtiyahooda nololeed. Habka dib u eegista wuxuu yeelan doona saddex weji: dib u eegis hore, dib u eegista xubnaha bulshada iyo habka dheelitirka maaliyadda si loo go'aamiyo talooyinka maalgelinta.

Wejiga koowaad wuxuu noqon doonaa dib u eegis hore oo lagu hubinaayo in codsiyada ay ka yimaadeen hay'adaha u qalma, in mashaariicda ay xaq u leeyihii in la maalgeeliyo, iyo in codsiyada ay dhammaystiran yihiin. Ka dib marka la dhammeeyo habka dib u eegista hore, wejiga labaad waa habka dib u eegista bulsheed. Kooxaha dib-u-eegayaal oo bulshada ka tirsan, kuwaas oo ka soo jeeda Region 10 oo aan xidhiidh la lahayn ururo kasta oo codsanaya lacaga deeqaha Thriving Communities ee Region 10 , ayaa shakhsii ahaan dib u eegi doona qayb yar oo codsiyo ah oo dhibcayn doonaan codsiyada, ka dibna koox ahaan isugu iman doona si ay markale u eegan dhibcaha oo wax uga beddelaan haddii loo baahdo.

Dhibcaha ka soo baxa kooxaha dib u eegista bulshada ayaa markaa waxaa soo ururin doona Philanthropy Northwest si ay u go'aamiyaan ku guulaystayaasha wareegaas maalgeelineed. Qaar ka mid ah talooyinka ku saabsan maalgelinta ayaa laga yaabaa inay sameeyaan shaqaaluhu si loo hubiyo in maalgelinta si siman loogu qaybiyo gobolka iyo bulshada qaybta ka ah hindisaha Justice40.

Shaqaalaha Philanthropy Northwest waxay la shaqeeyeen Guddigayaga La-talinta iyo Hawl-fulinta si ay u abuuraan nidaam dhamaystiran si ay dib ugu eegaan codsiyada deeqda, hubinta in guddiyada dib u eegista asaaga ay isticmaalayaan shuruudo iyo xeelado isku mid oo ka caawinayo nidaamka dib u eegistooda.

## 10. Shuruudaha Qiimaynta

Hoos waxaa ku qoran habka shuruudaha qiimaynta iyo dhibcaha lagu abaalmariyay deeqda Bulshooyinka Thriving Communities.

Mudnaanta Qorshaha Maalgelinta	Dhibcaha	Shuruudaha
Faa'iidada Bulshada, Ka-qaybgalka Bulshada, iyo Matalaadda Bulshada	60	<ul style="list-style-type: none"> <li>Barnaamiju wuxuu taageeraa bulshooyinka qaybta ka ah hindisaha Justice40</li> <li>Barnaamiju waxa uu xubnaha bulshada ka hawlgeleyaa oo uu qayb a dhigaa arrimaha la xidhiidha qorshaynta iyo dejinta yoolka</li> </ul>
Natiijada Ilaalinta iyo Sinnaan Deegaanka	30	<ul style="list-style-type: none"> <li>Barnaamiju wuxuu wax ka qabtaa ilaalinta iyo sinnaanta deegaanka: bulshooyinka wajahay waxyeellada aan la qexi karin ee cawaaqib xumada deegaanka ee ka dhasha hawlgeleeyada ganacsi ama fulinta barnaamijyada/siyaasadaha dadweynaha</li> <li>Barnaamiju wuxuu dejiyaa yoolal si cad loo qeexay wuxuuna isticmaalaa nidaam si uu ula socdo natiijooyinka.</li> </ul>
Miisaaniyadda *	10	<ul style="list-style-type: none"> <li>Kharashyada miisaaniyada ee la soo jeediyay waxay u muuqdaan kuwo macquul ah (la ogolaan karo) oo cad marka la eego baaxadda barnaamijka iyo muddada uu soconaayo</li> </ul>

\* SU'AALO QISO MIISAANIYADDA IYO MIISAANIYADDA AYAA LOO BAAHAN YA HAY DEEQAHAD NOQA 3

## 11. Shuruudaha Warbixinta

### Warbixinta Waxqabadka

Philanthropy Northwest waxay damacsan tahay inay fududayso culayska warbixinta ee deeqaha. Saraakiisha barnaamiju waxay la shaqayn doonaan deeq-bixiyeyaasha sida ay ula socon doonaan oo ay u cabbiri doonaan guulaha mashruuca, waxaana warbixinada lagu soo gudbin doonaa nidaamka Fluxx.

Warbixinada waxaa la soo gudbin doonaa saddexdii biloodba mar waxayna ka hadli doonaan waxa cusub iyo horumarka mashruuca, guulaha iyo caqabadaha la wajahay, natijjooyinka horu dhaca ah ee xogta iyo bayaan hawleedka la filayo inta lagu jiro xilliga warbixinta ee xiga, oo ay ku jiraan sharaxaadda qalabka, farsamooyinka iyo agabka la isticmaalo ama la qiiimeeyo. Wax kasta oo cusub oo ku aadan miisaaniyadda iyo horumarka qorshaha shaqada, oo ay ku jiraan isbeddel kasta oo ku yimaadda jadwalka la filayo iyo isticmaalka misaaaniyada, aaya sidoo kale lagu dari doonaa warbixinada. Warbixinta waa in sidoo kale lagu daraa wixii isbeddel kasta ah ee ku aadan shaqaalaha muhiimka ah ee la xidhiidha mashruuca.

## **12. Shuruudaha iyo Sharciyada**

Fadlan ka eeg shuruudaha iyo sharciyada Wakaalada Ilaalinta Deegaanka ee lagu dabaqi karo deeqda Bulshooyinka Region 10 ee barnaamijka deeqda Thriving Communities grant [websaydka EPA](#), ama dukumeenti gaar ah oo ku jira websaydkeena.